**MAXAAN SAMEEYAA HADDII BUDHCADNIMO KA JIRTO GURIGA DHEXDIISA?**

Haddii qof jooga gurigaaga uu waxyeelo gaadhsiiyo adiga ama caruurtaada, waxa muhiim ah inaad raadsatid gargaar:

1. La hadal qof aad aaminsan tahay: saaxiib, deris, xubin qoys, ama shaqaalahaaga bulshada.
2. Wac 911 haddii aad ku jirtid halis dhakhso ah. Boliiska ayaa iman doona gurigaaga oo badbaadin doona adiga iyo caruurtaada.
3. Haddii aanad ku hadlin Ingiriisi, wac Khadka Qaran ee Budhcadnimada Guriga Dhexdiisa (National Domestic Violence Hotline) oo ah: 1-800-799-7233. Wicitaanadu waa bilaash. U sheeg shaqaalaha teleefonka kaa qabta afka aad ku hadashid. Turjubaanka ayaa kuu sheegi doona waxa aad sameyn kartid iyo meesha aad ka heli kartid gargaar gudaha magaaladaada.

*Wicitaanada lagula xidhiidho Khadadka Budhcadnimada Guriga Dhexdiisa waa QARSOODI. Lagaama rabo inaad sheegtid magacaaga. Shaqaalaha teleefonku cidna uma sheegi doono wicitaankaaga.*

**Si aad u heshid war dheeraad ah oo ku yaala internetka oo ku saabsan budhcadnimada guriga dhexdiisa ee dhacda beelaha qaxootiga ah, fadlan booqo:**

www.endabuse.org

www.atask.org

www.apiahf.org/apidvinstitute

www.tapestri.org

www.mosaicservices.org


www.hotpeachpages.net

• • •

*Rugaha internekta ee sare waxa ku jira war dheeraad ah oo ku qoran afaf badan oo ay ku hadlaan qaxootigu.*

*Qoraalkan waxa lagu soo saaray maalgalin laga helay Xafiiska Dejinta Qaxootiga, Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Bini'aadanka (Office of Refugee Resettlement, Department of Health and Human Services).*

**WARKA LA-XIDHIIDHISTA:**
**riht@uscridc.org**
**U.S. Committee for Refugees and Immigrants**
**1717 Massachusetts Ave., NW**
**Suite 200**
**Washington, DC 20036**
**Teleefon: 202 • 347 • 3507**
**Faakis: 202 • 347 • 7177**
**www.refugees.org**



# Budhcadnimada Guriga Dhexdiisa

## Violence in the Home

## (Somali)

U.S. COMMITTEE FOR REFUGEES AND IMMIGRANTS
USCRI

**www.refugees.org**

*Protecting Refugees, Serving Immigrants, Upholding Freedom since 1911*

## WAA MAXAY BUDHCADNIMADA GURIGA DHEXDIISU?

Budhcadnimada guriga dhexdiisa waxa badanaa loogu yeedhaa xumeyn. Xumeyntu waxay dhacdaa marka qof uu waxyeelo ama cabsi soo celcelis ah gaadhsiiyo qof kale. Xumeynta waxa ku jira waxyeelo loo geysto jidhka qofka, dareenkeeda oo wax la waxyeelo, ama iyada oo lagu qasbo inay sameyso waxyaabo ay ka xumaanayso ama aanay doonaynin inay sameyso. Xumeyntu waxa kale oo ay dhacdaa marka qofka lagu yidhaahdo ma lihid maskax ama xoog ma lihid, ama ma awoodid inaad gaadhid go'aamo ku saabsan noloshaada.

## AYAA LA XUMEYN KARAA?

Qof kasta ayaa la xumeyn karaa: dad waaweyn, caruur iyo waayeel. Qoysaska xumeyntu ka dhex dhacdo, badanaa waxa la xumeeyaa haweenka, caruurta iyo waayeelka.

## CARUURTA

Caruurta budhcadnimo ku arka guriga waxay dareemaan cabsi iyo murugo. Badanaa, waxay rumeystaan in dhaqankoodu sababo budhcadnimada. Caruurta caafimaad uma laha inay ku noolaadaan guri ay ka jirto budhcadnimo. Caruurta budhcadnimo ku arka gurigooda badanaa waxa dhib ku ah dugsiga, waxay bilaabaan isticmaalidda maandooriyeyaasha ama daroogada iyo khamriga waxana ay noqon karaa laftooda kuwo isticmaala budhcadnimo.

## MIYAA LAGUGU HAYAA BUDHCADNIMO?

Waxa lagugu hayaa budhcadnimo haddii qof jooga gurigaaga:

- uu ku riixriixo, ku dhirbaaxo ama feedh kugu dhufto,
- uu ku hanjabo inuu ku dili doono ama waxyeelo ku gaadhsiin doono,
- uu ku hanjabo inuu kaa qaadan doono caruurta,
- uu ku canaanto oo niyadda kaa jabiyo wakhti kasta,
- aanuu kuu ogalaan inaad aragtid qoyskaaga iyo saaxiibadaa,
- uu kugu qasbo galmo marka aanad rabin,
- aanuu kuu ogalaan inaad shaqeysid oo aad heshid lacag kuu gaar ah,
- aanuu kuu ogalaan inaad baratid Ingiriisiga ama aad baratid wadista baabuurka,
- uu ku hanjabo inuu kugu celin doono wadankaagii, iyo
- inuu kaa qaadi doono dukumentigaaga imigarayshanka.

## WAA DAMBI

Waa inaan budhcadnimada guriga dhexdiisa ka dhacda la qarin. Budhcadnimo jidhka ama galmo ah oo lagula kaco xubin qoys waa sharci-daro gudaha Maraykanka. Boliiska iyo maxkamadaha ayaa badbaadiya dhamaan dhibaneyaasha budhcadnimada guriga dhexdiisa. Badbaadin gaar ah ayaa la siiyaa caruurta, haweenka, iyo waayeelka. Waa la xidhi karaa qofka ku kaca budhcadnimo guriga dhexdiisa ah.

## ADIGU KHALAD MA LIHID

Haddii lagu xumeeyo, macnaheedu ma aha inaanad ahayn afo ama hooyo fiican. Qofka ku xumeeya waxa uu rabaa inuu xukumo noloshaada.

## MA TIHID KALIGAA

Haddii qof ka tirsan qoyskaaga uu ku xumeeyo, waa inaad ogaatid inaanad kaligaa ahayn. In ka badan laba malyan oo haween ah ayaa waxa sannad walba xumeeya ragga qaba iyo rag la saaxiib ah gudaha Maraykanka.

Haddii aad taqaanid qof la xumeeyo, u sheeg inay heli karto gargaar:

- Gargaarka Degdegga ee 911: Boliis iyo ambalaas.
- Gabood Ka-badbaadin Budhcadnimo (Shelter): waa hoy amaan iyo bilaash ah oo loogu talogalay haweenka iyo caruurtooda.
- Amar Badbaadin oo Ku-meelgaadhsiis ah (Temporary Protection Order): Xaakin Maxkamad Qoys ayaa amri kara in qofka budhcadda ahi ka baxo guriga una soo dhawaan xaaskiisa iyo caruurtiisa.
- Gargaar Sharci: dhibaneyaasha dakhligoodu hooseeyo waxay heli karaan qareen ama looyar bilaash ah oo ka gargaari kara arrimaha sharciga, sida amar badbaadin, haynta ilmaha, taageero ama masruuf ilmo, ama furis.